

Shuruudaha cusub ee Bixiyaha Adeegga Geedka oo dhawaan imanaya!



Abril 5, 2022, Golaha Magaalada Seattle

wuxuu meel mariyay sharciga Golaha 120207 kaasoo u baahan in dhammaan adeeg bixiyayaasha geedka inay is diiwaan galiyaan si ay ganacsi uga sameeyaan Seattle.

Sharcigu wuxuu u baahan yahay inay milkiilayaasha hantidu isticmaalaan bixiyayaasha diiwaangashan oo ay ku dhajiyaan ogeysiis ku saabsan jarista weyn ama jarista geedaha saddex maalmood ka hor intaan shaqada la qaban. Xeerka cusub ee Agaasimaha si uu u caddeeyo qodobbada sharcigan cusub iyo talo bixin cusub oo ka caawisa codsabayaasha inay maraan nidaamka diiwaangelinta iyo ogeysiiska dadweynaha ayaa la daabici doonaa Sebtembar.

Maxay tani Muhiim u tahay

Magaalada Seattle waxaa ka go'an inay ilaaliso dulinka magaalada. Dhirtu waxay qiimo ku kordhiyaan hantidaada iyo bulshada kugu xeeran. Dhulka daboolan waa halbeeg muhiim ah oo lagu cabbiro caafimaadka kaynta magaalada. Dhirta magaaladu waxay keenan faa'iidooyin deegaan, dhaqaale iyo bulsho oo badan, oo ay ku jiraan deegaanka duurjoogta, ku noolaanshaha xaafadaha, iyo natiijooyinka caafimaadka bulshada oo la hagaajiyay. Diiwaangelintani waxay noqon doontaa mid ay heli karaan dadweynaha si milkiilayaasha, deganayaasha, iyo deriska loo xaqiijiyo shirkad diiwaangashan oo aqoon u leh sharciyada geedaha iyo hababka ugu wanaagsan ay dhamaystirayso shaqada xaafadooda.



Seattle Department of
Construction & Inspections



Shuruudaha Diiwaangelinta Bixiyaha Adeegga Geedka

Waaxda Dhismaha iyo Kormeerka Seattle (SDCI) waxay bilaabi doontaa diiwaan gelinta adeeg bixiyaha geedka Ogosto 26, 2022. Diiwaangelinta waxaa lagu daabici doonaa bogga SDCI code code ([https://www.seattle.gov/sdci/codes/codes-we-enforce-\(a-z\)/trees-and-codes](https://www.seattle.gov/sdci/codes/codes-we-enforce-(a-z)/trees-and-codes)) oo waxay ka koobnaan doontaa tusaha bixiyeyaasha adeegga geedka ee u qalma inay dhammaystiraan shaqada geed ka baxsan dayactirka joogtada ah ee hantida gaarka ah ee Seattle si waafaqsan xeerka geedka.

- Laga bilaabo Agoosto 26, bixiyeyaasha adeegga geedku waa inay abuuraan akoon oo ay iska diiwaangeliyaan SDCI <https://cosaccela.seattle.gov/>. Kani waa codsi dhijitaal ah; Haddii aad u baahan tahay foom codsi ah oo warqad ah ama aad u baahan tahay kaalmo buuxinta codsigaaga, fadlan naga soo wac (206) 233-5185 ama nagala soo xidhiidh <https://sdci.zendesk.com/hc/en-us/requests/new>. Si aad gacan uga geysaano codsigaaga, tilmaan in aad u baahan tahay in lagaa caawiyo “Ogolaanshaha, koodka, aagagga, qorshayaasha,” (permits, codes, zones, plans) ka dibna dooro “Isticmaalka Dhulka” (Land Use) sida nooca gargaarka aad u baahan tahay, ka dibna dooro “geedaha” (Tress) goobta sharaxaadda.
- Dhammaan bixiyeyaasha adeegga geedka ee fuliya ka saarista*, manjooyin waaweyn ***, ama adeegyada la-talinta geedaha Seattle *** waa inay is-diiwaangeliyaan Noofembar 10, 2022.
- Bixiyeyaasha adeegga geedka waa inay ka go’an tahay inay raacaan xeerarka ilaalinta geedaha ee laga helo SMC 25.11, Xeerka Agaasimaha 16-2008, iyo ANSI A-300 Heerarka Goynta (ama heerka xiga).
- Ku guuldareysiga is diiwaangelinta ama in lagu helo laba ganaax oo xadgudub ah waxay ka reebi doontaa bixiyeyaasha adeegga geedaha inay u qalma inay ganacsi ka sameeyaan Seattle.
- Fadlan ogow in diiwaanka bixiyaha adeegga geedka SDCI uu daboosho shaqada hantida gaarka ah oo uu ka duwan yahay diiwaan bixiyaha adeegga geedaha SDOT kaas oo nidaamiya shaqada ka dhacda jidka toosan ee dadweynaha. Waa in aad mid walba gooni gooni iskaga diiwaan gelisaa; Xiriirinta mid walba waxaa laga heli karaa <https://cosaccela.seattle.gov>.

* Ka saaritaanka geed kasta oo ka sarreeya dhexroorka 6 inji.

** Shaqada ugu weyn ee jarista geed kasta oo ku yaal hantida gaarka ah. Manjooyin weyn ayaa ka saaraya laan kasta ama xidid 2 inji dhexroor ama ka weyn, ama ka saarista in ka badan 15% ee geedka gashan. Uma baahnid in lagu diiwaan galiyo si aad u dhamaystirto manjooyin kale oo joogto ah iyo dayactirka geedaha.

*** Samaynta qiimaynta geedaha ee warbixinta dhir beerista.

Shuruudaha Milkiilaha Hantida

- Laga bilaabo Noofembar 10, waa inaad qortaa bixiyaha adeegga geedka ee diiwaangashan si aad u dhammaystirto inta badan shaqada geedaha ee gurigaaga. Waxaad awoodi doontaa inaad ka aragto liiska bixiyeyaasha ka diiwaan gashan bogga SDCI code code, [www.seattle.gov/sdci/codes/codes-we-enforce-\(a-z\)/trees-and-codes](https://www.seattle.gov/sdci/codes/codes-we-enforce-(a-z)/trees-and-codes), Oktoobar.
- Laga bilaabo Noofembar 10, milkiilayaasha hantida waxaa looga baahan yahay inay dhajiyaan ogeysiis dadweyne oo ku saabsan jarista weyn ama jarista geedaha guriga ugu yaraan saddex maalmood ka hor inta bixiyaha adeegga geedku uusan bilaabin shaqada. Si aad u abuurto ogeysiiska dadweynaha, waa inaad buuxisaa foomka lagu bixin doono <https://cosaccela.seattle.gov>.
- Milkiilayaasha hantida dhamaystiraya jarista joogtada ah iyo dayactirka geedaha hantidooda loogama baahna inay diiwaangeliyaan ama dhajiyaan ogeysiis.



Noocyada la turjumay ee macluumaadkan ayaa laga heli karaa websaydkayaga [www.seattle.gov/sdci/codes/codes-we-enforce-\(a-z\)/trees-and-codes](https://www.seattle.gov/sdci/codes/codes-we-enforce-(a-z)/trees-and-codes)